

FAAFIN  
الرسمية



RASMI AH  
الجريدة

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad

Muqdisho, 2 Maajo 1976

L. 5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya  
gudsheeda — *dihaddadana waa Sh. 200* Rukunka ik weydiisto waqtiga ibo gooyey wuxuu  
ka bilabmaa 1 Janayo. Ojimaha qortitaanku ER, halkii, sadar, iyo waxii, ka ya, waa 2 laba  
Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
— Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 7 ee 25 Disember 1975 — <i>W. Miisaaniyadda</i>	Bogga	247
SHARCI L. 8 ee 21 Abriil 1976 — <i>Meel Marin Heshiis</i>	»	265
LAW N. 8 of 21 April 1976 — <i>Instrument of Ratifi-</i> <i>cation</i>	»	266
SHARCI L. 9 ee 22 Abriil 1976 — <i>Dhisidda Warshadda</i> <i>Saliidda.</i>	»	267
SHARCI L. 10 ee 22 Abriil 1976 — <i>Dhishidda Warshadda</i> <i>Birta.</i>	»	272

## BOGGA LABAAD

### XEER

- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Maajo 1975, L. 44 — *Cad dhul Dowladeed la siiyay Jaalle Maxamed Cali Mowlana ku yaal Muqdisho Xaafadda Yaaqshiid Jidka Balcad kuna fadhiiya mq. 480.* » 277
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Maajo 1975, L. 45 — *Cad dhul Dowladeed la siiyay Jaalle Yuusuf Maxamed Sheekh ku yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaqshiid Jidka Balcad kuna fadhiiya mq. 480.* » 278

---

## BOGGA SEDDAXAD

### TALOOPYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Abriil 1976 — *Naada Dhul Jaalle Axmed Ugaas Maxamed. (88)* » 279
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Abriil 1976 — *Naada Dhul Jaalle Cabduraxmaan Shire Cali iyo Luul Shire Cali. (89)* » 280
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Abriil 1976 — *Naada Dhul Jaalle Qasaali Maxamed Axmed. (90)* » 281
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Abriil 1976 — *Naada Dhul Jaalle Aadan Maxamed Cawaale. (91)* » 282
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Abriil 1976 — *Beddelaad Naada Dhul Jaalle Hintir Xasan Yuusuf. (92)* » 283
- MAKAXAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21 Abriil 1976 — *Lumid Jeegga lamb. 11906, Sh. So. 100, u le-yahay Saldhigga Booliska Hodan. (93).* » 284
- SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA, S.p.A., 29 Abriil 1976 — *Ogeysiis isu Yeerid Shir Caadi ah. (94)* » 285-86  
— *Avviso di convocazione di Assemblea Ordinaria (94)*
- SOCIETA' COMEMRCIALE ITALO SOMALA, S.p.A., — *Ogeysiis isu Yeerid Shir Caadi ah. (95)* » 287-88
- SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA, S.A.I.S. - S.p.A. — *Ogeysiis isu Yeerid Shir Caadi ah. (96)* » 288-89

SHARCI L. 7 ee 25 Diisembar 1975.

Warbixinta Miisaaniyadda.

GOLAHA SARE EE KACAANKA  
GUDDOOMIYAHA

ISAGOO ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharcigan :

Qodobka 1aad

Dawladdu waxay awood u leedahay inay soo ururiso Dakhliga iyo inay bixiso Kharajka ku dhigan Miisaaniyadda halkan ku xiran ee dhan Shs. 1.116.179.824, marka laga bilaabo 1da Jennaayo ilaa 31ka Disembar 1976 iyadoo la raacayo habka iyo nidaamka ku qoran sharciyada lacagta.

Qodobka 2aad

1. Isbaddelka dhex mara laba madax oo kala duwan waxa awood u leh Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha.

2. Isbaddelka dhex mara madax-xigeennada isku madax amaba ha ahaadeen kharashka caadiga amaba ha ahaadeen mashruucyada waxa awood u leh Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda.

3. Isbaddelka lacagta hoos timaada madax-xiga walba oo u kala dhigan xuruufta waxa awood u leh Xoghayayaasha Wasaaradaha. Isbeddelka caynkaas ah ee ku saabsan Miisaaniyadda Dawladaha Hoose waxa awood u leh Guddoomiyayaasha Gobollada.

Qodobka 3aad

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay had-dii loo baahdo in uu kayd ka dhigo dhammaan ama qayb lacagta ku jirta madax-xige walba miisaaniyadda sannadkan 1976.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa 1da Jannaayo 1976, waxaanu ka mid yahay Sharciyada rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 25 Disember 1975.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Maxamad Siyaad Barre*

## WARBIXINTA MIISAANIYADDA

1 9 7 6

### FAAQIDAADDA GUUD EE DHAQAALAHA

1. Sannadka 1975ka xaaladda dhaqaalaha ee Soomaaliya waxaa aad u saamaysay abaartii oo heerkaa ugu sarreeyey gaartey sannadka 1975ka horraankiisa. 21 xeryo gargaar oo dawladdu dhistay ayaa waxaa lagu xannaaneeyey 270.000 qof, in gaarta 900.000 oo qof iyagana xeryaha dibaddooda ayaa lagu xannaaneeyey; dad kale oo badan oo abaartu waxyeelleysayna waxay ku soo biireen xigtadoodii tuulooyinka iyo magaaloyinka joogtey. Kharajka Dawladda dusheeda fuulay aad ayuu u lixaad weynaa; dhismaha iyo qaanqaaminta xeryaha iyo siinta cunto, biyaha, daawo iyo gargaar caafimaad waxay culaab culus saareen miisaaniyadda Dawladda inkastoo muruqii loo baahnaa laga helay Wasaaradaha, Hay'adaha kale ee Dawladda iyo dadweynaha. Kharajka kor lagu sheegay Dawladda waxaa u raacay kabiddii sicirrada cuntada oo ugu horraan laga hirgeliyey gobolladii abaartu waxyeelleysay kuwaasoo dakhligii dadku aad hoos ugu dhacay kaddib markii xoolihii oo dakhliga intiisa ugu weyn laga heli jirey ay aad u maarteen.

Qiimaha kharajka Dawladda Soomaaliyeed kaga baxay badeecoyin iyo adeegyada loo fidiyey gargaarka abaarta waxaa lagu qiyaasay 152 milyuun Sh. So. Dalalka iyo hay'adaha dibaddu waxay ku deeqeen cunto, daawo, dhar, qalab iyo lacag naqdi ah oo marka la isugeeyo gaara 328 milyuun Sh. So. Deeqdaas dibaddu waxtar weyn ayay u lahayd guushii laga gaaray gargaarka abaarta.

Barnaamijka gargaarka abaarta waxaa haddiiba la feerdhigay barnaamij la doonayey in dhaqaalaha dalka lagaga qayb geliyo dadkii abaartu waxyeelleysay iyadoo shaqooyin looga abuurayo waaxyaha beeraha iyo kulluumeysiga. (Gugii sannadkaan oo aarrankiisu iska wanaagsanaa markuu da'ay oo dadkii xeryaha kalluumeysatada cusub ee Dawladda. In lagu qiyaasay 150.000 oo qof ayaa noloshoodii hore dib ugu laabatay, in gaarta 120.000 oo qofna waxay doorteen inay ka qayb galaan mashaariicda dejinta).

Waxay Dawladdu markaas dhistay saddex degmo oo beeraley ah oo la dejiyay 120.000 oo qof; Beelo kuwaas ka yar yarna waxaa laga dhisay xeebaha badda oo la dejiyey 16.000 oo qof oo kalluumeysato cusub ah.

Dhinaca barnaamijka dejinta beeraleyda horumarku waxaa suurtoowda inuu gaabiyo kalluumeysatada. Waxaa la doonayaa in la abuurdo 60 kun ee hektar, qorshaynta iyo fulinta mashaariicda waraabintuna waqti ayay qaadan doontaa. Dawladdu waxay qabtaa in horumarinta waraabintu ay lagama maarmaan tahay, maxaa yeelay waa habka keliya oo dalka saldhig u noqon kara beero abuur wax-ku-ool ah iyadoo beero abuurka ku xiran roobku uu bandhigayo beelaha la dejiyey helis la mid ah noloshii ay horay ugu noolaan jireen.

Waxa dhinaca waqooyi ee dalka loo qorsheeyey mashruuc ku saabsan xannaanada xoolaha oo dhinac kasta saamaynaya, amaahdii mashruucaas loogu tala galayna oo, gaarta 20 malyuun oo Doollar waxaa laga helay Sanduuqa Horumarinta ee Kuwayt.

Inkastoo xoola badan la'deen (qiyaas: 300.000 oo geel ah, 1 malyuun oo lo' ah, 5 malyuun oo isugu jira riyo iyo ido), hase yeeshee xoolo dhoofintii 1975ka way wanaagsanayd.

Dakhligii ka yimid xoolaha la dhoofiyey wuxuu dhammaa 205 malyuun Sh. So., muddadii Jan-Oktoobar 1975ka oo garab yaal dakhli dhan 159 malyuun Sh. So., muddadii Jan-Oktoobar 1974kii. Natiijadaas lama-sugaanka ahayd oo wanaagsan waxaa dhaliyey waddammada inagu dhow oo xaaladda sayladahooda iyo sicirrada xooluhuba ku liiteen taasoo keentay in guuraagii xoolahoodii ka soo gudbiyaan xuduud ku-sheegga oo ay iib keenaan Jam. D. ee Soomaaliya.

2. Sida la iska fahmi karo waaxda labaad ee dhaqaale oo muhiimka ah oo abaartii aad u waxyeelleysay waa beeraha roobka ku baxa wixii laga helay xilligii goysmada Feb-Maarsa 1975ka aad ayay u yaraayeen. Beeraha waraabinta ku baxa oo qur ah ayay ka soo go'day qaddar galley ah iyo sisin, hase yeeshee beeraha waraabka ku baxa oo aalaaba loogu isticmaalo muuska iyo qasabka beeriddooda naftiigooda tacabkoodu ma sarreyn, maxaa yeelay abaarta awgeed labada webiba waa engegeen 1975ka horraankiisii, sidaas darteedna waraab wuxuu ka istaagey badan.

Roobabkii lixaadka lahaa oo da'ay bishii Maajo iyo dadaalkii xoogga lahaa oo Dawladdu saartay kordhinta tacabka galleyda iyo meseggada ayaa waxey dhaliyeen miro wanaagsan oo la guray xilligii Agoosto-Oktoobar 1975ka. Xilligaas Wakaaladda Horumarinta Beeraha waxay iibsatay galley iyo meseggo dhan 423 kun ee kiintaal. Hase yeeshee waxaad mooddaa in dhabtii beeraleydu ay ceshadeen mirihii qaarkood ayadoo miraha go'ay ay ka badnaayeen intaas, sidaas waxay u timid in beeraleydu ay cusbooneysiyaan keydkoodii gaarka ahaa oo giddigiis martay muddadii abaarta. Dhinaca qasabka sonkorta lagama gaarin soo saarid soo saarid siyaada ah, maxaa yeelay isdhinkii tacabka ee xilliyadii dambe, waxaaa kale oo ugu wacnaa doorsoonka dhulkii iyo suuradii qasabka. Marka la eego dakhligii Muuska la dhoofiyey waxaa laga dareemi karaa in soo saaridda muusku ay si door ah u korortay tan iyo Abriil-Maajo; muddadii Jannaayo-Oktoobar ee 1975ka dakhliga dhoofinta muuska wuxuu gaaray 55.9 malyuun Sh. So., oo garab yaal 47.9 malyuun Sh. So., ee muddadii ku aaddanayd kor u kac xagga sicirka muuska iyadoo la filayo in tirada muuska la dhoofiyey 1975ka ay wax yar isdhinto marka loo eego 1974kii.

3. Abaartii si kala geddisan ayay u saameysay soo saaridda Warshadaha ku shaqeeya beeraha waxa ka baxa. Soo saaridda sonkorta iyo Warshadaha casiirka miraha ee «ITOP» aad ayay hoos ugu dhaceen inkastoo sannadka dabaadigiisa la filayo inay madaxa kor u soo qaadaan.

Warshadda hilibku iyadu xataa markii abaartu ugu lixaad weyneyd tira helayeen inkastoo suuraddeedu aad u liidatay, taasoo keentay in warshaduhu sicir jaban ay ku soo iibsadaan, hase yeeshee sannadka bartankiisa heliddii lo'da waa yaraatay, sicirkeediina kor ayuu u kacay.

Kororsiimadii kharajka oo ay weheliso xaaladda adag ee seyladaha hilibka ee adduunka ayaa dhibaatooyin badan haleelsiiyay warshadaha hilibka, haleelsiiyey, hase yeeshee dhibaatooyinkaas oo jira ayaa dakhligii hilibka la dhoofiyey 1975ka uu aad uga sarreeyey 1974kii; muddadii Jan-September 1975ka lacagta adag oo hilibka laga helay waxay dhammayd 45.5 malyuun Sh. So., oo garab yaal 30 malyuun Sh. So., ee 1974kii oo dhan, inkastoo in badan oo dakhligii 1975ka ay ka timid hilib la soo saaray lana dhoofiyay, 1974kii, iyadoo ay ugu wacnayd xayiraaddii sannadkii hore loo soo raray lacagtii hilibka Suuqa Talyaaniga loo dhoofiyey qaarkeed. Waxaa intaa raaca in jiritaanka qandaraasyo ku muddaysan waqti dhexe ama dheer inay hilibkii Soomaaliya ay dhoo-fisey ay ka badbaadisey khasaaroyinkii seyladaha adduunka ee hilibka ay kala kulmeen warshadaha hilibka dhoofiya ee dalalka jaarka nala ah.

Dhakhligii dhoofinta kalluunka ee sagaalkii bilood oo hore ee sannadka wuxuu muujinayaa in soo saariddii warshadaha hilibka ee 1975ku inuu aad uga sarreeyn doono 1974kii haddii helidda kalluunku ay sii wanaagsanaato bilaha dhiman oo ah xilliga kalluunka kan ugu weyn.

Soo saaridda Warshadda dharka ee Somaltex waxaa dhalliilay hawlilii cusbooneysiinta warshadda inkastoo sannadka dabaadigiisa qalabkii cusbaa qaarkiis shaqada lagu bilaabay.

Baahidii lixaadka lahayd ee xagga keenidda oo ka timid abaarta iyo hawlaha maalgelinta ayaa culaab xoog leh saartay dheellitirkii ganacsiga Soomaaliyeed. Hase yeeshee waxaa la filayaa in dheellitirka xisaabaha dibaddu ee 1975ka uu keeno dheeraad gaara 140 malyuun Sh. So. Arrimaha hoose ayaana ugu wacnaa natiijadaas lama filaanka ahayd:

— Dakhliga dhoofinta oo aad uga sarreeyey 1974kii sababaha ugu wacnaana horay loo sheegay. Dakhligii dhoofintii muddadii Jan-Oktoobar 1975ka wuxuu gaaray 376 malyuun Sh. So. oo garab yaal 284 malyuun Sh. So. ee muddadii la mid ahayd ee 1974kii.

— In badan oo ka mid ah cuntadii dibadda looga baahnaa waxaa daboolay deeq dibadeed.

— Iyadoo ay ugu wacan tahay ciriiri keenidda lagu soo rogey, keenidda badeecadda la nafacaysto (consumer goods) hoos ayay u dhacday; taasii siiba waxay dhacday nuskii dambe ee sannadka. Muddadaas oo keeniddu si muuqata uga hooseysey muddadii ku aaddanayd ee 1974kii (lacagtii keenidda ku baxday muddadii Jan-Oktoobar 1975: 630 malyuun Sh. So. Jan-Oktoobar 1974: 674 malyuun Sh. So.).

— Soo gelid hanti dibadeed oo rasmi ah oo loogu tala galay bar-naamijka dejinta iyo mashaariic kale oo horumarineed ee ku meel gaar ahaan xoojiyey keydkii dibadda.

Waxaa la filayaa in shaqo helidda (marka laga reebo xoolo-dhaqata) ay siyaaddey 1975ka - waxaa shaqo abuuray warshadaha cusub, hawlaha dhismaha iyo mashaariicda kale ee horumarinta.

5. 1976ka Dawladdu xooggeeda waxay isugu geyn doontaa sidii dhaqso horay loogu qaadi lahaa barnaamijka dejinta. Himilada ugu weyni waxay tahay in la ballaarsho dhulka waraabka lagu abuurayo si deg-deg loo gaaro isku fillaansho xagga cuntada. Roob yaridii Dayrtii hadda inaga tagtay ayaa muujisay baahida loo qabo in si dhaqsa leh loo gaaro himilooyinkaas. Waxaa la filayaa in miraha go'i doona xilliga Feb-Maarsa 1976ka ay aad u hoosayn doonaan, taasoo dalka ku kallifi doonta in dibadda laga keeno galley iyo meseggo tiro badan.

Soo saaridda muuska iyo sonkorta waxaa suurto gasha inay kororto marka loo eego 1975ka, maxaa yeelay ilaa hadda ma jiraan wax muujinaya in roob yaridii ay waxyeelleynayso beeraha waraabka ku baxa; sidaa darteed waxay u baahan tahay in soo saaridda muuska iyo sonkorta ay kor u kacdo 10%.

Kaalinta xoolaha nool ay xagga dhoofinta ka gelayaan waxay ku xiran tahay hadba sida xaaladda suuqyada waddammada inagu dhowi ay tahay iyo dadaalka Dawladdu ay saarto sidii loo hagaajin lahaa gaadiidka xoolo-dhoofina ee waddammada Carbeed.

Haddii xaaladda suuqyada waddammada aan jaarka nahay ay isbedesho waxay u badan tahay in dhoofinta xooluhu ay hoos u dhacdo ama ayan kor uga kicin heerkii 1975ka.

Soo saaridda warshaduhu waxaa la filayaa inay kororto 1976ka. Soo saaridda sonkorta waxaa la qiyaasayaa inay 10% kor u kacdo iyadoo ay ugu wacan tahay qasabka oo tacabkiisa loo kordhiyo iyo maalgelinta warshadda ka socota. Soo saaridda hilibka iyadu way hakan doontaa, maxaa yeelay lama filayo in xaaladda suuqyada adduunku soo wanaagsanaato 1976ka dhammaadkiisa ka hor. Soo saaridda warshadaha kalluunka waxaa la filayaa inay kororto kaddib markii ballaarin loo qorsheeyey doonyaha kalluumeysiga ee Soomaaliya. Warshadda dharka waxaa laga sugayaa in soo saariddeedu si laxaad leh u fiddo oo ay taasi Soomaaliya u suuro geliso isku fillaansho xagga nooc kasta oo dharka ah, kuwa yar maahane sannadka 1976ka gudihisa. Intaas waxaa raaca warshado ka mid ah kuwa yar-yar iyo kuwa dhexe oo la sameeyey 1975ka (baastada, shubka birta, ranjiga) si buuxda ayay u shaqayn doonaan sannadka foodda nagu soo haya.

Guud ahaan Dawladdu waxay wadi doontaa dadaalkeeda ah in maal iyo muruq iyo maskaxba la isugu geeyo horumarinta dhaqaalaha dalka. Sidii horay loo muujiyay maalgelinta beeraha, kaluunka iyo warshadaha ku shaqeeya beeraha waxa la soo saaro ayaa la hormarin doonaa.

5. Bankiga Dhexe wuxuu bishii Nofember 1974kii amray in guud ahaan la istaajiyo fididda amaahsiinta, kaddib markii ay muuqatay in keydka dibaddu si khatar leh oo dhagaale uu u hoobanayey oo ay wehelisey fidid ee amaahsiinta iyo kororsiimo lixaad leh ee wareegga lacagta iyo xisaabta socota (money supply).

Muddadii 1975ka oo dhan Bankiga Dhexe wuxuu sii watay siyaasaddiisii ciriirinta ahayd. Tallaabooyinkii Bankigu uu qaadayna guul weyn ayaa laga gaarey:

Amaahsiinta dhinaca khaaska ah iyo Wakaafadaha dawladda qadder yar ayay korortay, 52 malyuun Shs. (+0.5%) muddadii u dhaxeysay Disember 1974 iyo Jannaayo 1975, wareegga lacagta iyo xisaabta socota waxay kordheen 26 malyuun Sh. So. keliya (+4%). Keydka caadiga ah iyo kan muddaysan waxay kor u kaceen 13 malyuun Sh. So. keliya (+4%).

Kaydka caadiga ah iyo kan muddaysan waxay kor u kaceen 13 malyuun Sh. So. (+8.5%) marka la feerdhigo kororsiimo dhan 20% ee muddadii ku aaddanayd ee sannadkii hore. Hoos u dhaca kororsiimadii kaydka caadiga ah iyo kan muddaysan wuxuu muujinayaa adkaynta xaaladdii naqadka ee dalka la adkeeyey iyo darsashada kaydii dhinaca khaaska ah oo ay ugu wacnayd wixii ku kordhay macaashka oo ka hooseeey wixii ku kordhay sicirrada kharajka.

Siyaasaddii ciriirinta amaahsiinta iyo soo gelin deeq dibadeed oo rasmi ah ayaa waxay dhaliyeen in kaydii lacagaha adag ay ku kordhaan 190 malyuun Sh. So., isagoo ku istaagey 372 malyuun Sh. So., bishii Juunyo 1975ka dhammaadkeedii.

Iyadoo qiimihii Sh. Soomaaliga ahaa oo dhigmay deeqdaas lagu shubay xisaabaha gaarka ah oo Dawladdu ku leedahay Bankiga Dhexe, wareeggii lacagta iyo xisaagta socota wax yar ayay ka saamaysay soo geliinka lacagahaas adagi. Kaddib markii la helay deeq dibadeed oo rasmi ah xaaladda saafida ah ee Maaliyadda Dawladdu waxay kor u kacday 156.7 malyuun Sh. So. nuskii hore ee 1975ka.

Waxaa mooodaa in nuskii dambe ee sannadka 1975ka xasilloonidii moyan si buuxda u sii jirin. Wareegga lacagtu si lixaad leh ayuu u kordhay (+26%) Juunyo iyo Nofember 1975ka dhexdooda), taasoo ay ugu wacnayd hor-ahaantii ganacsiga xoolaha nool oo fiday ayna wehelisay xilligii iibsiga mirihii iska wanaagsanaa ee guga. Teeda kale lacagta keenidda ku baxday aad ayay uga hoosaysay muddadii ku aaddanayd ee sannadkii horey (Luulyo-Oktoobar 1974: 215 malyuun - Luulyo-Oktoobar 1974: 288 malyuun Shs.); waxay taasi dhaliisay in dheellitirkii ganacsiga ee Oktoobar 1975ka uu muujiyo dheeraad lama filaan ah oo saafiga ahina wuxuu ku istaagey 400 malyuun Sh. So.

Marka kaydka lacagaha adag ee Soomaaliyeed la eegayo waa in xisaabta lagu daraa, in badan oo kaydkaas ka mid ah (qiyaas 330 malyuun Shs.) ay ku summadaysan tahay mashaariic horumarineed. Lacagahaas badidooduna waxay mar hore meelaysan yihiin qandaraasyo la geliyo oo lagu keenayo makiinado iyo qalab kale. Haddaba marka la eego xaaladda naqadka dibadda oo ah mitirka lagu qiyaaso siyaasadda lacagta iyo amaahsiinta, Bankiga Dhexe waa inuu weli ku sii adkaystaa siyaasaddiisii ahayd ciriirinta amaahsiinta.



7. Waxaa dhammaan la ogsoon yahay in intii Kacaanka Hanti-wadaagga ahi dhashay doorka ay dhaqaalaha Dawladdu ka ciyaareyso sanadba kan ka dambeeya uu sii kordhayo, taasoo micnaheedu yahay in ay sii ballaaranayso hantida iyo hawlaha ay Dawladdu gacanta ku hayso. Tusaale ahaan waxay Dawladdu sannadkii 1975 tolaysay dhammaan keenidda iyo qaybinta alaabta dibedda uga timaadda dalka, taasoo hore gacanta ugu jirtay ganacsato kala duwan. Ulajeeddada go'aannadaas laga lahaa waxay tahay in alaabada nolosha dadweynaha lagama maarmaanka u ah Dawladdu maamusho, in la suuro geliyo qorshayn dhaqaale iyo in faa'iidada ka dhalanaysa lagu biiriyo kharajka raasumaalka ee lagu bi-xinayo horumarinta bulshada.

Waxaa iyana xusid mudan, in ay Dawladdu tallaabo ka qaaday nidaaminta Maaliyadda Wakaaladaha iyo safaynta deymanka ay isku lahaayeen Hay'adaha Dawladdu. Tallaabooyinkaasoo dhami Miisaaniyadda waxay u leeyihiin waxtar dakhliga kordhinaya.

Sida laga war qabo laga bilaabo sannadkii 1974 waxay Wakaaladu qeyb libaax ka qaadanayeen dakhliga Miisaaniyadda oo sanad walba saamigoodu soo kordhayo, gaar ahaanna sannadka 1976 waxay soo wareejinayaan lacag gaaraysa 149.6 milyan oo ka badan 36.4 milyan oo Shilin intii sannadkii hore. Waxaana lagu han weyn yahay sannadaha soo socda in ay korodhsiimahaasi noqoto mid waarta nagana furata ku tiirsanaanshaha cashuurta keenidda alaabta (Import Taxes), siiba haddii la tixgeliyo in aan cashuuraha toosan la kordhin karin maadaama ay imikadan culus yihiin oo aan waqtiyadan gaarsiin karin heer inta ay joogaan ka badan. Sidoo kale lama filayo in la kordhiyo cashuuraha dadban sannadkan, maxaa yeelay waxay saamaynaysaa ascaarta badeecadaha dadweynaha dakhliga yar isticmaalaan.

In kastoo sida muuqata aan habka cashuuraha la filayn in ay wax iska baddelaan, haddana dakhligu si caadi ah ayuu u kordheyaa taasoo ka imaanaysa maamulka ururinta cashuuraha oo la xoojiyey, isbeddelka ascaarta iyo ballaarashada hawlaha laga qaado cashuuraha.

Had iyo jeer waxaa garab socda kororsiimaha dakhliga, kharashka oo isaguna si lixaad leh u batay lana socda isbeddelka bulshada Soomaaliyeed xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo mujtamaca.

Xagga fidinta hawlaha guud (Public Services) waxay Dawladdu iska xilsaartay sidii Degmooyinka dalku ka kooban yahay oo dhan loogu sahli lahaa helitaanka waxyaabaha taabanaya noloshooda ee ay ka mid yihiin Tacliinta, Caafimaadka, Isgaarsiinta iwm, taasina waxay la imaanaysaa kharashka hawlaha iyo alaabada oo korodha.

Sannadka 1976 waxaa si xoog leh loogu tabaabulshaystay si gaar ahna miisaaniyadda loogu tixgeliyey horumarinta Beeraha iyo Biyaha. Sidaa daraaddeed waxaa sannadkan la fulinayaa mashaariic biyo-waraabin ah oo waaweyn oo saldhig u noqonaya beeridda dhul ballaaran oo noo suura gelaya kordhinta tacabka beeraha, gaar ahaan soo saaridda cuntada. Dhinaca biyaha oo qiimo weyn u leh xoolaha iyo dadkaba, waxaa lagu kharash garayn doonaa qeyb ballaaran oo ka mid ah Miisaaniyadda Horumarinta ee Sannadkan.

Sidoo kale, waxaa ahmiyad gaar ah la siiyey ballaarinta waxbarashada, caafimaadka, warshadaha, gaadiidka iyo horumarinta khayraadka badda iwm.

Mashaariicdaas iyo hawlaha kale ee kordhay waxaa muuqata in ay soo jiidayaan shaqo siintii oo si lixaad leh u fidda, taasoo sare u qaadaysa kharashka shaqaalaha.

Kaddib markii wax laga taataabtay siyaabaha ay isugu xiran yihiin socodka dhaqaalaha iyo miisaaniyaddu, waxaan iminka u gudbaynaa faahfaahinta miisaaniyadda dawladda.

## B) DAWLADDA DHAN

Sannadka 1976 dakhliga iyo kharashka guud waxay gaarayaan Sh. So. 2.326 milyan. Lacagtaasi waxay ka kooban tahay miisaaniyadda Dawladda oo dhan Sh. So. 1.116 milyan iyo qeybta mashaariicda ee ka baxsan miisaaniyadda oo lagu qiyaasay Sh. So. 1.210 milyan.

Miisaaniyadda Dawladdu sida la ogyahay waxay ka kooban tahay, Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, tan Dawladda Hoose iyo tan Wakaladaha, kororsiimada dakhliga joogtada ah, waxa guud ahaan u sabab ah lacagta ka soo gasha cashuuraadka iyo hantida Dawladda oo badatay. Kharajka joogtada ahna waxa kor u kiciyey lacagta ku baxaysa shaqaalaha iyo hawlaha Dawladda oo kordhay.

Dakhliga iyo kharashka Miisaaniyadda raasumaalka ee Dawladda waxay kala yihiin Sh. So. 291.3 milyan iyo Sh. So. 375.6 milyan. Halkan waxaa soo baxaysa isdhimid dhan Sh. So. 84.3 milyan, taasoo lagu ka baayo deyn u dhiganta. Miisaaniyaddan badankeeda waxa lagu kharashgaraynayaa hantigelin lagu kordhinaayo raasumaalka dalka.

Sidaan korba ku soo sheegnay Miisaaniyadda Dawladdu waxay ka kooban tahay saddex xubnood mid walbana marka gaar ahaan loo dhigo tafaasiisheedu waa sida hoos ku qoran:

## T) DAWLADDA DHEXE

Dakhliga iyo kharashka Dawladda Dhexe waxaa lagu qiyaasay sannadka 1976 lacag dhan Sh. So. 880 milyan wuxuuna kor u kacay Sh. So. 141.9 milyan, markii sannadkii hore loo eego.

Dakhliga joogtada ah, wuxuu noqonayaa Sh. So. 806 milyan oo u dhiganta 92% ee dakhliga oo dhan; kharajka joogtada ahna wuxuu ku qiyaasan yahay Sh. So. 685 milyan oo la mid ah 78% ee kharajka oo idil, halkaas waxa ka soo baxaya dheeraad joogto ah oo gaaraya Sh. So. 121 milyan. (Fiiri Shaxda 2aad).

Sannadka 1975 wax isbeddel ah kuma dhicin sharciyada iyo habka cashuuraha ee JDS, waxaana sidii hore dakhliga badidiis laga filayay ama laga soo uruuriyey furdadaha iyo Wakaladaha Dawladda.

Waxa la qiyaasay sannadka 1976 in ay kororsiimo dakhli ka timaado qaybaha soo socda:

1) Cashuuraha la xiriira ganacsiga dibedda (gaar ahaan keenidda alaabta) kuwaasoo ay ku kordheen lacag dhan Sh. So. 60 milyan. Labo waxyaalood ayaa la filayaa inay kororsiimadaas sabab u noqdeen, waa mide maamulka keenidda alaabta oo la toleeyey, taasoo horjoogsanaysa alaabtii sharcidarrida dalka lagu soo gelin jirey, midda kale waa tirada alaabta la keenayo oo badan doonta, maadaama kaydki badeecadaha oo yaraanaya la soo buuxin doono si loo tixgeliyo baahida sii kordhaysa.

2) Cashuurta iyo qaybta faa'iidada oo si joogto ah looga soo wareejinayo Wakaaladaha, waxa ku biiray lacag dhan Sh. So. 30 milyan. Taasoo ay sababtay, inuu batay dheeraadka ay soo saaraan, oo ka yimid hawlaha iyo wax-qabashada wakaaladaha oo siyaaday. (Fiiri Shaxda 3aad).

Dhinaca kharashka isbeddelka ka dhacay wuxuu sidii muraayaddii u muujinayaa fulinta go'aannada ku saabsan kordhinta hawlaha dawladdu gacanta ku hayso, gaar ahaan kuwa la xiriira amniga waddanka, kobcinta dhaqaalaha iyo bulshada. Kordhinta kharashka waxa u sabab ah shaqaalaha iyo hawlaha Wasaaradaha oo ballaartay. (Fiiri Shaxda 4aad).

Dheeraadka joogtada ah, oo sidaan horayba u sheegnay, ka soo haraya miisaaniyadda joogtada ah, waxa lagu biiriyey miisaaniyadda raasumaalka oo noqonaysa Sh. So. 195 milyan oo dhowr qaybood ah (1) Hantigelin Dawladdu toos u fulinayso oo dhan Sh. So. 150 milyan.

(2) Lacago lagu wareejinayo hay'ado la xiriira Dawladda Dhexe, (Dawladdaha Hoose, Wakaaladda Horumarinta Biyaha, Jaamacadda Ummadda), looguna tala galay kharashyo raasumaal ah, gaarayana Sh. So. 44.5 milyan iyo (3) Bixinta deynta Dawladda lagu leeyahay Sh. So. 20.0 milyan.

Maadaama dakhliga miisaaniyadda raasumaalka dhan yahay Sh. So. 139 milyan keliya, wuxuu ka hooseeyaa kharashka Sh. So. 56 milyan, faraqaas waxa lagu kabayaa amaah ay Dawladdu ka qaadayso dibedda iyo gudaha.

Sababaha keenay kororsiimada kor ka muuqata, waxa lagu soo koobi karaa qodobbada hoose:

b) Horumarinta dhaqaalaha waddanka iyadoo xoog la saarayo dhinaca beeraha, biyaha, «infrastructure», warshadaha iyo kalluumka; kharashka badidiis wuxuu ku baxayaa mashaariicda biyaha iyo biyo waraabinta, kuwa xannaanada iyo tijaabada beeraha, dhismo iyo hagaajinta gegida dayuuradaha, jidadka iyo buundooyinka, dhismaha warshadaha (Shimeentada, Hargaha, Safeynta Saliidda, Sonkorta) iyo wanaajinta isticmaalka khayraadka badda.

t) Kor u qaadidda heerka tacliinta iyo caafimaadka bulshada, taas oo ka muuqata kharashka badan oo ku baxaya macallimiinta iyo ardayda ka qayb qaadanaysa waxbarashada khasabka ah iyo dhismaha ballaaran ee dugsiyada Sare. Dhinaca caafimaadka waxa la xoojiyey shaqaalaha isbitaallada iyo shaybaarrada. Waxa kaloo sannadkan la kordhiyey kharashka dhismaha isbitaallada iyo iibsiga qalabka caafimaadka.

j) Xoojinta daafacaadda waddanka.

x) Horumarinta iyo kalkaalinta degmooyinka waddanku ka kooban yahay iyo bixinta deynta dawladda (Maaliyadda).

## J) WAKAALADAH A DAWLADDA

Dheeraadka joogtada ah ee Wakaaladaha wuxuu dhan yahay Sh. So. 273.3 milyan, dakhliyada raasumaalka ahna Sh. So. 59.3 milyan, isugeynta lacagtaas oo dhan Sh. So. 332.6 milyan waxa lagu kharashgaraynayaa:

1) Hantigelin saafi ah ————— Sh. So. 155.7 milyan;

2) Wareejinta cashuurta, qaybta faa'iidada iyo qaybta qiimo-dhaca ee dawladda oo dhan Sh. So. 149.6 milyan, iyo 3) Kordhinta hantida lacagta ee Wakaaladaha oo lagu qaddaray Sh. So. 26.9 milyan.

Dheeraadka joogtada ah ee sannadka 1976-75 wuxuu kordhay Sh. So. 41.1 milyan oo ka yar tii sannadkii hore oo lagu qiyaasay 56.5 milyan. Sababta ugu weyn ee keentay isdhimiddaas waxa weeye kharashka joogtada ah ee Wakaaladaha oo siyaaday bacdamaa hawshoodu ballaaratay.

— Kaydyada kala duwan oo Wakaaladuhu horay u dhisi jireen oo hadda yaraaday, maadaama ay gaarsiyeen heerkii loogu tala galay.

— Hanti-geliinkii Wakaaladaha oo kororsiimadiisu yaraatay dabadeedna la yimid in siyaadada qiima-dhaca ka yaraado qiyaastii 1975-74.

Kororsiimada dakhliga raasumaalka ah waxaa keenay amaahda siyaadda ee Wakaaladuhu qaadanayaan.

Hantigelinta saafiga ah waxay hoos u dhacday 19%, taasoo ku timid in ay yaraatay sannadkaan hantigelinta badeecadda hareysa sannadka dhammaadkiisa.

Wareejinta Wakaaladaha miisaaniyadda Dawladda Dhexe way badatay 32%, waxayna ka timid macaashka guud ee Wakaaladuhu samaynayaan oo siyaaday.

## X) DAWLADAH A HOOSE

Dakhliga iyo kharashka guud ee Dawladda Hoose waxa sannadka 1976 lagu qiyaasay lacag dhan Sh. So. 91.6 milyan, wuxuuna kordhay Sh. So. 13.2 milyan, markii sannadkii hore loo eego.

Dakhliga joogtada ahi wuxuu dhan yahay Sh. So. 82.0 milyan (91%), kharashka joogtada ahna wuxuu gaarayaa Sh. So. 66.2 milyan (72%). Haddaba halkaa waxaa ka soo baxaya dheeraad joogta ah oo dhan Sh. So. 16.7 milyan kaasoo lagu shubaayo miisaaniyadda raasumaalka ah.

Sababaha ugu waaweyn ee dhaliyey kororsiimada dakhliga Dawladaha Hoose waxay yihiin (a) Dawladda Dhexe oo kordhisay deeqdii joogtada ahayd ee ay siin jirtey Dawladaha Hoose iyo (b) Cashuuraha qaarkood oo kor loo qaadayo iyo labka uruurintooda oo la hagaajinayo. Dakhligu, hase yeeshee uma kordhin sidii la filaaeyey, maxaa yeelay dhibaatooyinkii abaarta oo weli taagan.

Kororsiimada kharashka joogtada ahna waxa keenay (a) Shaqaale badan oo loo qorayo degmooyinka, gaar ahaan kuwa cashuuraadka ururiya iyo Dawladda Hoose ee Xamar oo dib-u-haysata qaabka shaqaaleheeda (b) alaabo iyo qalab kala duwan oo la xiriira biyagelinta, nalgelinta iyo waxbarashada.

Miisaaniyadda raasumaalka ee Dawladaha Hoose waxa sannadka 1976 lagu qiyaasay 25.4 milyan. Dakhligu wuxuu ka kooban yahay dheeraadka miisaaniyadda joogtada ah, iyo deeqda raasumaalka ee ay Dawladda Dhexe siinayso Dawladaha Hoose.

Lacagtaa inteeda badan (71%) waxa lagu kharash-gareynayaa hantigeliin la xiriira horumarinta degmooyinka.

# MIISAANIYADDA DAWLADDA EE SANNADKA 1976

## DAKHLIGA IYO KHARASHKA GUUD

<i>TILMAAN</i>	1975	1976	FARAO
Miisaaniyadda Dawladda . . . . .	940.144.123	1.116.179.824	+ 176.035.701
Qaybta Mashaariicda ee ka baxsan Miisaaniyadda . . . . .	423.517.932	1.210.055.060	+ 786.537.128
Isugeyn	1.363.662.055	2.326.234.884	+ 962.572.829

## MIISAANIYADDA DAWLADDA DHEXE

### SOO KOOBIDDA DAKHLIGA IYO KHARASHKA

<i>Dakhliga</i>	1975 <i>Ku noqoshada Qiyaasta</i>	1976 <i>Qiyaas</i>	<i>Faraq</i>	<i>Kharashka</i>	1975 <i>Ku noqoshada Qiyaasta</i>	1976 <i>Qiyaas</i>	<i>Faraq</i>
Dhakhliga				Kharashka			
Joogtada ah	684.082.394	806.176.559	+ 122.094.165	Joogtada ah	606.147.772	685.321.100	+ 79.173.328
Dakhliga				Kharashka			
Raasumaalka	54.017.606	73.823.441	+ 19.805.835	Raasumaalka	131.952.228	194.678.900	+ 62.726.672
Isugeyn	738.100.000	880.000.000	+ 141.900.000	Isugeyn	738.100.000	880.000.000	+ 141.900.000

# MIISAANIYADDA DAWLADDA DHEXE

## FAAFINTA DAKHLIGA

<i>Madax-xige</i>	<i>Tilmaan</i>	<i>1975 Ku noqoshadii Qiyaasta</i>	<i>1976 Qiyaas</i>	<i>Faraq</i>
1.1.0.	<i>Cashuurta wax soo saaridda iyo kharashka</i>			
1.1.1.	Cashuurta keenidda alaaba	203.000.000	250.000.000	+ 47.000.000
1.1.2.	» Diridda alaabta	10.000.000	15.000.000	+ 5.000.000
1.1.3.	» Maamulka iyo tirada	57.000.000	65.000.000	+ 8.000.000
1.1.4.	» Sonkorta iyo khamriga	95.000.000	100.000.000	+ 5.000.000
1.1.5.	» Buuriga iyo tarraqa	60.000.000	65.000.000	+ 5.000.000
1.1.6.	» Diiwaangelinta	9.000.000	10.000.000	+ 1.000.000
1.1.7.	» Moorka	42.000.000	45.000.000	+ 3.000.000
1.1.8.	» Socodka baabuurta	1.000.000	2.000.000	+ 1.000.000
1.1.9.	» Kale ee dadban	2.500.000	3.000.000	+ 5.000.000
	<i>Isugeyn</i>	479.500.000	555.000.000	+ 75.500.000
2.1.0.	<i>Cashuurta Dakhliga</i>	18.000.000	20.000.000	+ 2.000.000
2.1.1.	Cashuurta caadiga ah ee dakhliga shaqada	5.000.000	5.000.000	—
2.1.2.	» Dakhliga kale	5.000.000	5.000.000	—
2.1.3.	» Caadiga ahayn ee dakh. shaqada	15.000.000	20.000.000	+ 5.000.000
	<i>Isugeyn</i>	38.000.000	45.000.000	+ 7.000.000

FAAFINTA DAKHLIGA

<i>Madax-xige</i>	<i>Tilmaan</i>	<i>1975 Ku noqoshadii Qiyaasta</i>	<i>1976 Qiyaas</i>	<i>Faraq</i>
3.1.0.	<i>Wareejinta kalee joogtada ah ee gudaha</i>			
3.1.1.	<i>Ganaaxa iyo wareejinta qasabka ah ee kale</i>	800.000	2.000.000	+ 1.200.000
3.1.2.	<i>Wareejinta khiyaarka ah</i>	—	—	—
3.1.3.	<i>» kale ee joogtada ah</i>	—	1.500.000	+ 1.500.000
	<i>Isugeyn</i>	800.000	3.500.000	+ 2.700.000
4.1.0.	<i>Dakhliga hantida Dawladda</i>			
4.1.1.	<i>Dakhliga ruqsada dhulka</i>	200.000	—	— 200.000
4.1.2.	<i>Dakhliga ruqsada kale</i>	4.000.000	4.000.000	—
4.1.3.	<i>Cashuurta geddiska ee Wak. Dawladda</i>	54.475.311	76.628.857	+ 22.153.546
4.1.4.	<i>Qeybta Dawladda faa'iidada Wakaaladaha</i>	50.107.083	57.947.702	+ 7.840.619
4.1.5.	<i>Korsocodka</i>	100.000	—	— 100.000
	<i>Isugeyn</i>	108.882.394	138.576.559	+ 29.694.165
5.1.0.	<i>Dakhliga alaabta iyo hawsha</i>			
5.1.1.	<i>Ajuurka dekedaha</i>	20.000.000	20.000.000	—
5.1.2.	<i>Ajuurka gegida dayuuradaha</i>	2.000.000	2.000.000	—
5.1.3.	<i>Dakhliga Boostada</i>	2.500.000	2.600.000	+ 100.000



## FAAFINTA DAKHLIGA

<i>Madax-xige</i>	<i>Tilmaan</i>	<i>1975 Ku noqoshadii Qiyaasta</i>	<i>1976 Qiyaas</i>	<i>Faraq</i>
5.1.4.	Dakhliga Taararka	5.200.000	5.000.000	— 200.000
5.1.5.	» Telefoonnada iyo telekiska	5.000.000	6.000.000	+ 1.000.000
5.1.6.	» Dugsiyada	1.000.000	500.000	— 500.000
5.1.7.	» Faafinta iyo Iidhahda	500.000	500.000	—
5.1.8.	Ajuurada Nootaayada	1.000.000	1.000.000	—
5.1.9.	Ajuurada Diiwaangelinta maraakiibta iyo cashuurta Xamuulka	3.000.000	1.000.000	— 2.000.000
5.1.10.	Dakhliga gadidda alaabta	700.000	1.000.000	+ 300.000
5.1.11.	Dakhliga kale ee alaabta iyo hawsha	1.000.000	500.000	— 500.000
	Isugeyn	41.900.000	40.100.000	— 1.800.000
6.1.0.	<i>Wareejina joogada ah ee dibedda</i>			
6.1.1.	Qaadhaan Miisaaniyadeed	15.000.000	24.000.000	+ 9.000.000
6.1.2.	Qaadhaan Mashruucyada degdegga ah	—	—	—
	Isugeyn	15.000.000	24.000.000	+ 9.000.000
7.1.0.	<i>Gadidda hantida Raasumaalka ah</i>			
7.1.1.	Cadidda dhulka	—	—	—

FAAFINTA DAKHLIGA

<i>Madax-xige</i>	<i>Tilmaan</i>	<i>1975 Ku noqoshadii Qiyaasta</i>	<i>1976 Qiyaas</i>	<i>Faraq</i>
7.1.2.	Gadidda Hantida kale	—	—	—
	Isugeyn	—	—	—
8.1.0.	<i>Wareejinta Raasumaalka ee gudaha</i>			
8.1.1.	Wareejina Raasumaalka ee D. Hoose	5.789.190	3.000.000	— 2.789.190
8.1.2.	Wareejina Raasumaalka ee Wakaafadaha	8.880.106	15.008.250	+ 6.128.144
8.1.3.	Wareejinta Raasumaalka ee kale	—	—	—
	Isugeyn	14.669.296	18.008.250	+ 3.338.954
9.1.0.	Wareejinta Raasumaalka ah ee dibedda	—	—	—
	Isugeyn	—	—	—
10.1.0.	<i>Amaahda</i>			
10.1.1.	Amaahda gudaha	16.000.000	15.815.191	— 184.809
10.1.2.	Amaahda dibedda	23.348.310	40.000.000	+ 16.651.690
	Isugeyn	39.348.310	55.815.191	+ 16.466.881
	Isugeyn Guud	738.100.000	880.000.000	+ 141.900.000

## MIIASANIYADDA DAWLADDA DHEXE

### KHARASHKA CAADIGA AH IYO KA MASHAARIICDA MADAX-MIISAANIYADEED AHAAN

Madax	Wasaaradaha	1 9 7 5			1 9 7 6			+ Faraq — 1975 - 1976	
		Caadiga	Mashaariicda	Isugeyn	Caadiga	Mshaariicda	Isugeyn		
1. 1.0.	Madaxtooyada G.S.K.	19.866.510	—	19.866.510	20.767.684	—	20.767.684	+	901.174
1. 2.0.	Wasaaradda Maaliyadda	89.982.777	—	89.982.777	94.755.091	—	94.755.091	+	4.772.314
1. 3.0.	Wasaaradda Arrimaha Dibedda	23.084.210	—	23.084.210	27.540.683	—	27.540.683	+	4.456.473
1. 4.0.	Wasaaradda Gaashaandhigga	145.000.000	—	145.000.000	165.000.000	—	165.000.000	+	20.000.000
1. 5.0.	Wasaaradda Garsoor, iyo Diinta:								
	1.5.1. (a) Waaxyaha Maamulka	8.196.899	—	8.196.899	8.523.248	—	8.523.248	+	326.349
	1.5.2. (b) Ciidanka Asluubta	17.863.452	—	17.863.452	18.949.920	—	18.949.920	+	1.086.468
1. 6.0.	Wasaaradda Arrimaha Gudaha								
	1.6.1. (a) Waaxyaha Maamulka	8.338.715	1.280.000	9.618.715	7.454.710	1.600.000	9.054.710	—	564.005
	1.6.2. (b) Ciidanka Booliska	49.752.924	—	49.752.924	53.124.414	—	53.124.414	+	3.371.490
1. 7.0.	Wasaaradda Hawlaha Guud	18.443.683	6.770.000	25.213.683	21.577.880	11.865.000	33.442.880	+	8.229.197
1. 8.0.	Wasaaradda Macd. iyo Biyaha	9.230.211	20.800.000	30.030.211	8.781.780	37.283.118	46.064.898	+	16.034.687
1. 9.0.	Wasaaradda Beeraha	24.818.751	28.239.000	53.057.751	27.133.232	42.778.240	69.911.472	+	16.853.721
1.13.0.	Wasaaradda Gaadiidka	29.869.178	—	33.888.247	15.470.778	20.355.960	35.826.738	+	2.438.491
1.10.0.	Wasaaradda X., Dhirta iyo Daaqa	15.797.386	17.590.861	33.388.247	3.166.428	10.134.600	13.301.028	+	4.764.500
1.11.0.	Wasaaradda Kall. iyo G. Badda	2.566.528	5.970.000	24.690.309	741.265	30.020.000	30.761.265	+	6.070.956
1.12.0.	Wasaaradda Warshadaha	655.309	24.035.000	29.869.178	31.300.655	11.000.000	42.300.655	+	12.431.477
1.14.0.	Wasaaradda Boost. iyo Isgaar.	13.403.727	—	13.403.727	14.371.443	—	14.371.443	+	967.716
1.15.0.	Wasaaradda Ganacsiga	2.849.498	—	2.849.498	3.288.397	—	3.288.397	+	438.899
1.16.0.	Wasaaradda Dalxiiska	1.438.830	—	1.438.830	1.292.635	2.560.000	3.852.635	+	2.413.805

## KHARASHKA CAADIGA AH IYO KA MASHAARIICDA MADAX.MIISAANIYADEED AHAAN

Madax	Wasaaradaha	1 9 7 5			1 9 7 6			+ Faraq	
		Caadiga	Mashaariicda	Isugeyn	Caadiga	Mshaariicda	Isugeyn	— 1975 - 1976	
1.17.0.	Wasaaradda Waxbarashada	62.729.266	15.600.000	78.329.266	77.414.338	20.528.112	97.942.470	+	19.613.181
1.18.0.	Wasaaradda Tacliinta Sare	12.376.697	1.750.000	14.126.697	16.436.468	1.958.000	18.394.468	+	4.267.771
1.19.0.	Wasaaradda Caafimaadka	40.628.070	—	40.628.070	47.395.293	1.650.000	49.045.293	+	8.417.227
1.20.0.	Wasaaradda Sh. iyo Isboortiga	2.584.329	623.000	3.207.329	3.475.070	2.668.884	6.143.954	+	2.936.625
1.21.0.	Wasaaradda War. iyo Han. Dad.	12.355.189	3.610.000	15.965.189	16.636.674	1.000.000	17.636.674	+	1.671.485
	Isugeyn	611.832.139	126.267.861	738.100.000	684.598.086	195.401.914	880.000.000	+	141.900.000

## BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 8 ee 21 Abriil 1976.

Meel Marin Heshiis.

### GUDDOONSHAHA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKU UARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21. Oktoobar 1969, iyo Sharci 1aad;

MARKUU ARKAY Heshiiska deynka ah ee lagu horumarinaayo Mashruuca Waraabinta ee Janaale iyo Buulo Mareerta;

MARKUU ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

#### Qodobka 1aad

Heshiiskii dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyaa iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kaasoo ku saabsan lacagta Mashruuca Baarista Waraabinta Janaale — Buulo Mareerta oo la saxiixay 31 Diisembar 1975, waa la meel mariyay.

#### Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu lahaanayaa astaan Sharci ah Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqriidiga ee Soomaaliya.

Muqdisho, 21 Abriil 1976.

### GUDDOONSHAHA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Ş. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

LAW No. 8 of the 21 April 1976.

Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT  
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN the First and Second Charters of the Revolution of 21st October, 1969 and Law No. 1;

HAVING SEEN the loan Agreement for Financing the Genale-Bulo Marerta Irrigation scheme study;

TAKING NOTE of the approval of the Supreme Revolutionary Council and the Council of the Secretaries of State;

HEREBY PROMULGATE:

The following law:

Article 1

The loan Agreement Signed on the 31st day of December, 1975, between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development fund for Financing the Genale-Bulo Mererta irrigation scheme study, is hereby duly ratified by the Government of the Somali Democratic Republic.

Article 2

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall be published in the Somali Official Bulletin.

Muqdisho, 21 Abriil 1976.

THE PRESIDENT  
of the Supreme Revolutionary Council  
*Major General Mahamed Siad Barre*

SHARCI L. 9 ee 22 Abriil 1976.

Dhisidda Warsahadda Saliidda.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SAREE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21, Oktoobar, 1969 iyo Sharciga lamb. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELIYEEY Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Gclaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QAYBTA 1aad

Qodobka 1aad

*Habka Guud*

1. Warshadda Saliidda ayaa halkan lagu dhisay oo hadda kaddib la oran doono «Warshadda».

2. Warshaddu waxay tahay mid madax bannaan oo jirid iyo shakhsiyad qaanuuni ah leh.

3. Warshaddu waxay u hogaansami doontaa Sharcigan iyo Sharciyada soo socda:

a) Sharciga lamb. 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka dambaysay ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan;

b) Sharciga lamb. 36 ee soo baxay 21kii Abriil 1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan;

t) Sharciga lam.58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 ee lacagaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan;

4. Warshaddu waxay ka mid noqon doontaa qaybta «C» ee War-kaaladdaha Madax Banaan;

Qodobka 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Warshadda*

Xarunta Wershaddu waxay ahaan doontaa Magaalada Muqdisho, haddii loo baahdaa waxay ku yeelan doontaa Laamo Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

Qodobka 3aad

*Ilaalinta Guud ee Wershadda*

1. Ilaalinta guud ee Warshadda waxaa yeelan doona Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Warshadaha.

2. Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo awaamiir ama talooyin markay ugu muuqato inay hagaajinayaan maamulka Warshadda.

Qodobka 4aad

*Ujeedooyinka*

Ujeedooyinka Warshaddu waxay yihiin:

- a) Inay maamusho, ilaaliso, hagaajisana wax alla wixii ku saabsan Salidda soo-saariddeeda iyo wixii ganacsigeeda ku lug leh.
- b) Inay dhiirigeliso, gacanna ka gaysato wixii ku saabsan horu-kaca Salidda iyo wixii Saliidda ku lug leh.

Qodobka 5aad

*Awoodda*

Warshaddu waxay awood sharci ah u leedahay, iyadoon ku xadgudbin Sharcigan, inay gaarto ujeedooyinka loo dhisay ee ku xusan qodobka 4aad ee Sharcigan, iyo gaar ahaan ganacsiga waxay soo saarto.

QAYBTA 2aad

Qodobka 6aad

*Xubnaha Warshadda*

1. Warshadda waxa u madax noqon doona Maareeye Guud, waxaana lagu magacaabi doona Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Warshadda.

2. Warshaddu waxay ka koobnaan doontaa Waaxyo, Xubno iyo Laamo.

Qodobka 7aad

*Hawsha Maareeyaha Guud*

1. Maareeyaha Guud waxa loo xilsaaray, isagoo masalaya Warshadda, fulinta ujeedooyinka ku xusan qodobka 4aad ee Sharcigan, hawshiisuna waxay tahay:



- a) inuu saxiixo heshiisyada ay Wershddu dhinac ka tahay;
- b) waxa uu mas'uul ka noqon doonaa habka maamulka shaqada Wershadda, wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta Shaqalaha Warshadda;
- t) wuxuu mas'uul ka noqon doonaa lacagta Warshadda;
- j) inuu ku dhaqaaqo wixii qaraar ah ee degdeg ah isagoo isla markaas ogeysiinayaa Xoghayaha Wasaaradda Warshadaha.
- x) inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;
- kh) inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Warshadda ee caadi ah;
- d) inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wershadda ee aan ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Xoghayaha Wasaaradda Warshadaha.

2. Marka uu shaqada ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jiraan sabaab ka reeba shaqada, waxa uu u magacaabi doonaa ku-sime Sarkaal ka tirsan Waaxyaha Warshadda isagoo ka haysta oggolaansho Xoghayaha Wasaaradda Warshadaha.

Qodobka 8aad

*Xuquuqda qaanuuniga iyo dhaqaalaha ee Shaqaalaha Warshadaha*

Xuquuqda qaanuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha kale ee Warshadda, waxaa xukumi doona Sharciga lam. 36 ee 22 Abriil 1972 ee ku saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 9aad

*Magacawga Agaasimeeyaasha*

Warshaddu waxay yeelan doontaa Agaasime ama Agaasimeyaal waa-xood oo lagu magacaabi doono Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Warshadaha.

Qodobka 10aad

*Qoriinka Shaqaalaha*

Habka loo qorayo iyo shuruudaha shaqada ee Shaqaalaha Warshadda waxay noqon doonaan sida lagu caddeeyey Sharciga lam. 36 ee 22 Abriil 1972 iyo Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lam. 74 ee 22 Abriil 1972.

Qodobka 11aad

*Hantida Warshadda*

Hantida Wershaddu waxay ka kooban tahay:

- a) Wax alla wixii ay haysato marka Sharcigani uu dhaqan galo.
- b) wixii siismo ah oo kaga yimaado xagga Dawladda amase Wakaladaha Dawladda ee Madaxa Bannaan; ururrada caalamiga ah iyo kuwa goonida ah.
- t) wixii ka soo gala shaqooyinka ay qabato.
- j) wax alla wixii soo gala oo kale.

Qodobka 12aad

*Miisaanyadda*

1. Meereeyaha Guud, marka ay tahay 50ka Oktoobar ama inta ka horraysa sannad kasta, waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda ku saabsan sannadka maaliyadda soo geleyso isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Warshadda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayayaasha Wasaaradaha Wershaddaha, iyo Maaliyadda.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wershadda waa inay ahaataa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyadda Dawladda.

Qodobka 13aad

*Xiritaanka Xisaahaha*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horraysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa miisaaniyad xiritaanka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo kharajka Warshadda, taasna uu u gudbiyo Wasaaradda Wershaddaha iyo tan Maaliyadda.

2. Xoghayaha Wasaaradda Wershaddaha wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda inuu oggolaado miisaaniyadda xiritaanka, wuxuuna amar ku soo bixin doonaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Warshaddu.

Qodobka 14aad

*Sannadka Maaliyadda*

Sannadka Maaliyadda ee Warshaddu waxay ka bilaabmaysaa 1da Jannaayo, waxayna ku dhammaataa 31ka Diisembar sannad walba.

Qodobka 15aad

*Amaah Sharci ah*

Warshaddu, iyadoo haysata guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Warshadaha, wax waa ka amaahan kartaa hay'adaha amaahda ee dibedda iyo Bankiyada gudaha si ay u hirgeliso xilkii la saaray ama ujeedooyinkii Warshadda.

Qodobka 16aad.

*Shaqaalaha*

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda. Maareeyaha Guud, Agaasimeyaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha kale ee Warshadda ama Warshadaha ma geli karaan ganacsi farsamo lid ku ah danaha iyo ujeedooyinka Warshadda.

Qodobka 17aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka Lacagta ee Warshadda waxaa xukumaya Sharciga lam. 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

QAYBTA 3aad

Qodobka 18aad

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Warshadaha, inuu gudoomiyo Xeer Guud oo Warshadda xukuma si looga hortago dhibaataada ka imankarta wixii aan ku sheegnayn sharcigan.

Qodobka 19aad

*Dhaqan Gelid*

1. Sharcigan degdeg ayuu u dhaqaan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
2. Sharcigani wuxuu ka mid noqon doonaa Sharciyada iyi Xeer-rarka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.
3. Qof waliba waa inuu dhawraasoo tixgeliyaa, kuna khasbaa dadka kale inay dhowraan sharcigan.

Muqdishu, 22 Abriil 1976.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 10 ee 22 Abriil 1976.

Dhisidda Warshadda Birta.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969 iyo Sharciga lam. 1 ee 21 Oktoobar, 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QAYBTA 1aad

Qodobka 1aad

*Habka Guud*

1. Wershadda Birta Shubta iyo Waabka Makaanikada ayaa halkan lagu dhisay oo hadda kaddib la oran doono «WERSHADDA BIRTA».

2. Wershaddu waxay tahay mid madax bannaan oo jirid iyo shakhsiyad qaanuuni ah leh.

3. Wershaddu waxay u hoggaansami doontaa Sharcigan iyo Sharciyada soo socda:

a) Sharciga lam. 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka dambaysey ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan iwm.

b) Sharciga lam. 36 ee soo baxay 22kii Abriil 1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

t) Sharciga lam. 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 ee Lacagaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

4. Wershaddu waxay ka mid noqon doontaa Qaybta «C» ee Wershaddaha iyo Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Wershadda*

Xarunta Warshaddu waxay ahaan doontaa magaalada Muqdisho, haddii loo baahdose waxay ku yeelan doontaa Laamo Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

Qodobka 3aad

*Ilaalinta Guud ee Wershadda*

1. Ilaalinta Guud ee Wershadda waxaa yeelan doona Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Wershaddaha.

2. Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo awaamir ama talooyin markay ugu muuqato inay hagaajinayso maamulka Wershadda.

Qodobka 4aad

*Ujeedooyinka*

Ujeedooyinka Wershaddu waxay yihiin:

- a) inay aasaas u noqoto, horumarna ku samayso farsamada Biraha iyo inay sare u dhigto shaqooyinka la xiriira farsamada biraha;
- b) inay iibsato alaabta ceeriin (Raw Material) si ay u shubto biro kala jaad ah oo ka samaysan birciideed, bir-maareed iyo bir-na-xaas;
- t) inay soo saarto bir-ciideed wanaagsan iyo bir-qoran (Grey cast iron and machined parts) si loogu isticmaalo Wershadda xagga hagaajinta qalabka wershadaha;
- j) inay soo saarto biro la shubay oo kala duwan iyo biraha-qoran (machined parts) si looga haqab tiro xubnaha iyo hay'adaha ku isticmaala birahaas;
- x) inay soo saarto alaabta xafiisyada ee bir ka samaysan iyo maa-cuunka guryaha;
- kh) inay noqoto xarunta tababarka shaqaalaha heerarkooda kala duwan sida-xirfad-yaqaanka, farsamayaqaanka iyo injineerrada;
- d) inay soo saarto alaabta dhismaha ee biraha ka samaysan;
- r) inay noqotaa xarunta laga ballaarin doono bir-shubidda Wershadaynta waddanka.

Qodobka 5aad

*Awoodda*

Wershaddu waxay awood sharci ah u leedahay, iyadeon ku xadgudbin Sharcigan, inay gaarto ujeedooyinka loo dhisay ee ku xusan qodobka 4aad ee Sharcigan, iyo gaar ahaan ganacsiga waxay soo saarto iyo farsamocoyinka ay qabato.

QAYBATA 2aad

Qodobka 6aad

*Xubnaha Wershadda*

1. Wershadda waxa u madax noqon doona Maareeye Guud, wa-xaana lagu magacaabi doonaa Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Go-laha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Wershadaha.

2. Wershaddu waxay ka koobnaan doontaa Waaxyo, Xubno iyo Laamo.

Qodobka 7aad

*Hawsha Maareeyaha Guud*

1. Maareeyaha Guud waxa loo xilsaaray, isagoo masalaya Wershadda, fulinta ujeedooyinka ku xusan qodobka 4aad ee Sharcigan, hawshii-suna waxay tahay:

- a) inuu saxiixo heshiisyada ay Wershaddu dhinac ka tahay;
- b) inuu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada wershadda, wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wershadda;
- t) wuxuu mas'uul ka noqon doonaa lacagta Wershadda;
- j) inuu ku dhaqaaqo wixii qaraar ah ee degdeg ah isagoo isla marka ogeysiinaya Xoghayaha Wasaaradda Wershadda;
- x) inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;
- kh) inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Warshadda ee caadi ah;
- d) inuu fuliyo wixii hawl-maamulka shaqada Wershadda ee aan caadi ahayn isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Xoghayaha Wasaaradda Wershadda.

2. Marka uu shaqada ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jiraan asbaab ka reeba shaqada, waxa uu u magacaabi doonaa ku-sime Sarkaal ka tirsan Waaxyaha Warshadda isagoo ka haysta oggolaansho Xoghayaha Wasaaradda Wershadda.

Qodobka 8aad

*Xuquuqda Qaanuuniga iyo Dhaqaalaha ee Shaqaalaha Wershadda*

Xuquuqda qaanuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wershadda, waxa xukumi doona Sharciga lam. 36 ee 22kii Abriil 1972 ee ku saabsan shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 9aad

*Magacowga Agaasimayaasha*

Wershaddu waxay yeelan doontaa Agaasime ama Agaasimeyaal Waa-xood oo lagu magacaabi doono dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Wershadda.

Qodobka 10aad

*Qorriinka Shaqaalaha.*

Habka loo qorayo iyo shuruudaha shaqada ee shaqaalaha Wershaddu waxay noqon doonaan sida lagu caddeeyey Sharciga lam. 36 ee 22kii Abriil 1972 iyo Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lam. 74 ee 22kii Abriil 1972.

Qodobka 11aad

*Hantida Wershadda*

Hantida Wershaddu waxay ka kooban tahay:

- a) wixii dawladdu taageero ahaan u siiso Wershadda;
- b) qiimaha wixii alaab ah ee UNDP-UNIDO taageero u siiso Wershadda;
- t) wax alla wixii kasoo gala waxay Wershaddu soo saarto ama shaqadeeda;
- j) hantida ma-huraanka ah iyo midda guurta ee Wershadda;
- x) wax alla wixii kale ee Wershaddan soo gala, deeq ahaan.

Qodobka 12aad

*Miisaaniyadda*

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horraysa sannad kasta, waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda ku saabsan sannadka maaliyadda soo gelaya isagoo faahfaahinaya kuna muujnaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wershadda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo oggolaado Xoghayayaasha Wasaaradda Wershadaha iyo Maaliyadda.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wershadda waa inay ahaataa mid la socota oo tixgelisa miisaaniyadda Dawladda.

Qodobka 13aad

*Xiritaanka Xisaabaha*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horraysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyad xiritaanka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo kharajka Wershadda, taasna uu u gudbiyo Wasaaradda Wershadaha iyo Maaliyadda.

2. Xoghayaha Wasaaradda Wershadaha wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda inuu oggolaado miisaaniyadda xiritaanka, wuxuuna amar ku soo bixin doonaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Wershaddu.

Qodobka 14aad

*Sannadka Maaliyadda*

Sannadka maaliyadda ee Wershaddu waxay ka bilaabmaysaa 1da Jannaayo, waxayna ku dhammaataa 31ka Diisambar sannad walba.

Qodobka 15aad

*Amaah Sharci ah*

Wershaddu, iyadoo haysata guddoonka Xoghayaha Wasaaradda Wershadaha, wax waa ka amaahan kartaa hay'adaha amaahda ee dibedda iyo Bankiyada gudaha si ay u hirgeliyo xilkii la saaray ama ujeeddooyinkii Wershadda.

Qodobka 16aad

*Shaqaale*

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda, Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha kale ee Wershadda ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeeddooyinka Wershadda.

Qodobka 17aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka lacagta ee Wershadda waxa xukumaya Sharciga lam. 58 ee soo baxay 31kii Luulyo, 1972 ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

QAYBTA 3aad

Qodobka 18aad

*Xeerarka Guud*

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Wasaaradda Wershadaha, inuu guddoomiyo xeer guud oo Wershadda xukuma si looga hortago dhibaata ka iman karta wixii aan ku sheegnayn Sharcigan.

Qodobka 19aad

*Dhaqan gelid*

1. Sharcigani degdeg ayuu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

2. Sharcigani wuxuu ka mid noqon doonaa Sharciyada iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

3. Qof waliba waa inuu dhawraa oo tixgeliyaa, kuna khasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigan.

Muqdisho, 22 Abriil 1976.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*



XEER L. 44 ee 10 Maajo 1975.

Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalle Yuusuf Maxamed Sheekh, ku yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaq-Shiid Jidka Balcad kuna fadhiya mq. 480.

### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 1 Nofembar 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jannaayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Yusuf Maxamed Sheekh taariikhdu markay aheyd 14 Agosto 1974, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho Xaafadda Yaaq-Shiid kuna dhacaaya qaybta VII;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 10 soona baxday 1da Oktoobar 1974, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 4460, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 25aad taariikhduuna ahayd 26 Jannaayo 1975;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 195052 ee 9-2-1975 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Yuusuf Maxamed Sheekh uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 480, kuna saabsan qiimaha dhulka ee dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 480, loona tiriyay Yuusuf Maxamed Sheekh sida ku cad xaashida qor-480, loona tiriyay Yuusuf Maxamed Sheekh sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna aheyd 8 Febraayo 1975;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;

### X E E R

Waxaa cad dhul Dowladda ah la siiyay Yuusuf Maxamed Sheekh oo ku yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaq-Shiid Jidka Balcad, kuna fadhiya mq. 480.

Muqdisho, 10 Maajo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA  
WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

*Diwaanka lamb. 1, bogga lamb. 18.*

*Muqdisho, 9 Juunyo 1975.*

*Hantiidhawraha Guud:*

*G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

XEER L. 45 ee 10 Maajo 1975.

Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalle Maxamed Cali Mowlana, ku yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaq-Shiid, Jidka Balcad kuna fadhiya mq. 480.

### XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 1 Noofember 1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jannaayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Maxamed Cali Mowlana taarikhdu markay aheyd 14 Agosto 1974, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho, Xafadda Yaaq-Shiid kuna dhacaaya qaybta VII;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 10 soona baxday 1da Oktoobar 1975, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1,4459, kuna saabsan dhismo dhaxgaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 25aad taarikhduna ahayd 26-1-1975;

ISAGA OO ARKAY Bolletada lamb. 195051 ee 9-2-1975 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taasoo caddeyneysa in Maxamed Cali Mowlana uu bixiyey lacag dhan Shs. So. 480, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 480 loona tiriyay Maxamed Cali Mowlana sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 8 Febraayo 1975;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

### X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Maxamed Cali Mowlana oo ku yaal Muqdisho, Xaafadda Yaaq-Shiid Jidka Balcad, kuna fadhiya mq. 480.

Muqdisho, 10 Maajo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA  
WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY  
*Diwaanka lamb. 1, bogga lamb. 20.*  
*Muqdisho, 9 Juunyo 1975.*  
*Hantidhawraha Guud:*

## BOGGA SEDDAXAD

TALOOPYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Ugaas Maxamed, u usoo qor-tay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 2-10-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafad-da Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar ah 28x26, kuna fadhiya 728 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Gal lamb. 134-75.

Bari waxaa ka xiga: Gal lamb. 1417-5.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhul-ka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxq laga doodi karaa muddo ku 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 22 Abriil 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabduraxmaan Shire Cali iyo Luul Shire Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 22-2-1976, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh qiyaas Afar-gees siman 20x20, kuna fadhiya 400 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Axmed Shire.

Koofur waxaa ka xiga: Faaduma Xaaji.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Saciid Xasan.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxq laga doodi karaa muddo ku 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 22 Abriil 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

(89)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Qasaali Maxmaed Axmed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 19 Jannayo 1976, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waaberi, oo leh qiyaas trabesiyo 2,30+11x17,50 kuna fadhiya 116,40 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhulka uu Iibsaday asagu.

Koofur waxaa ka xiga: Waddada Mediina.

Galbeed waxaa ka xiga: Tahlil Warsame.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxq laga doodi karaa muddo ku 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 22 Abriil 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

(90)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aadan Maxamed Cawaale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahyad 26 Luulyo 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas trabeesiyo 30+26x20:2, kuna fadhiya 560 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada 30ka meytar ah.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lambar 3.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lambar 13.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lambar 11.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxq laga doodi karaa muddo ku 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 22 Abriil 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Moydhane*

(91)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Hintir Xasan Yuusuf, maalintii 20-4-1961, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan 4 Km., Jidka Afgooye, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolaar, addimihiisuna ahaayeen 102x34, kuna fadhiye 3468 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 545308 ee 7-3-1962, kana baxday xafiis kaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa tarabeeyo addimihiisu yihiin 16; 12; 34; 60:2, kuna fadhiya 484,40 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Waddada is-ku xirta Xamar iyo Afgooye.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Meykal Mariano.

Muqdisho, 22 Abriil 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

HADDUU Arkay Dacwadda L. yahay 39/76 B.G.

MARKUU Arkay Waxey ku saabsan Tahay iyo Ogeysiiska Bangigga Ganacsiga Ummadda. Ogaaday inay Shaqadiisa Tahay.

HADDUU Arkay Qod. 69 D. L. 9-9-65 N. 2. Lumidda Jeeqga lamb. 11906 ee ku qornay Saldhigga Boliska Hodon, oo ay ku Qorneyd Lacag Dhan 100 Shilin.

WUUXU AMRAYAA

In Loo sameeyn Doono Ga nacta na Laga Saari doono Saldhigga Kor ku qoran ee aan kor ku soo sheegnay limidiisa kaddib markii 15 maalmood ka soo wareegto Maalinta dekereetadda lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In jeegaas la sameeyn doono Gacantana laga Saaridoono Saldhigga Boliska Hodan, ama Saldhigga isla asaga ah sita Wakaalad Sharci ah ayidoo la sugaayo Muddo 15 Maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 21 Abriil 1976.

Guddoomiyaha Maxk. Gobolka Banaadir

*W. S. Jaalle Cabdullahi Daahir Barre.*

*arre.*



SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S.p.A.

Saldhigga: Kismaayo (J.D. Soomaaliya) — Ra'sumaal Shs. So. 1,500,000,00

---

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qayaasha Sharikadda Società Romana in Somalia - S. p. A., waxaa la isu yeeray Shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Xafiiska Sharikadda S.A.I.S. ku leedahay Milaano, Piazza degli Affari n. 3, maalinta 11ka Juunyo 1976 saacadda markii ey tahay 11,30, fadhiga ugu horeeya, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doona maalinta 30ka Juunyo 1976 isla saacadda kor ku qoran, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarayaasha;
2. — Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31-12-1975.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buuga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka kor maalinta fadhiga la qaban doono oo na ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda ee Kismaayo amase Xafiiska Sharikadda S.A.I.S. ku yaal Itaaliya, Piazza degli Affari, 3, Milano amase:

- Credito Italiano — Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).

Muqdisho, 29 Abriil 1976.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S. p. A.

Sede Sociale: Chisimato (Repubblica Democratica Somalia)

Capitale Sociale interamente versato Shs. So. 1.500.000,00

---

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Romana in Somalia — S.p.A. — sono convocati in Assemblea Ordinaria in Milano, presso gli Uffici di Recapito della Spett. S.A.I.S., Piazza degli Affari n. 3, per il giorno 11 Giugno 1976 alle ore 11,30 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 30 Giugno 1976 nello stesso luogo ed alla stessa ora, per deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Bilancio e Conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1975 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Chisimato o gli Uffici di Recapito della S.A.I.S., in Italia, Piazza degli Affari 3, Milano, oppure le seguenti casse:

- Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugana (Svizzera).
- Credito Italiano — Sede di Milano.

Mogadiscio, 29 Aprile 1976.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

(94)

SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S. — S.p.A.

Saldhigga: Muqdisho (J. D. Soomaaliya) — Ra'sumaal Shs. So. 5.000.000,00

## OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Commerciale Italo Somala — S.C.I.S., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Xafiiska Sharikadda S.A.I.S. ay ku leedahay Milaano, Piazza degli Affari, 3, maalinta 11 Juunyo 1976 saacaddu markey tahay 8, fadhiga ugu horeeya, haddi taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doona maalinta 30ka Juunyo 1976 isla saacadda kor ku qoran, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarayaasha;
2. — Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31-12-1975.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qabayaa-sha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono oo na ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Sharikadda S.A.I.S. ay ku leedahay Milaano, Piazza degli Affari, 3, amase:

- Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).
- E.I.F.A., Via Pioda n. 14, Lugano (Svizzera).
- Credito Italiano, Sede di Milano.

GUDDIGA MAAMULKA

(95)



SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S. — S.p.A.  
Sede Legale: Mogadiscio (Repubblica Democratica Somala)  
Capitale Sociale interamente versato Shs. So. 5.000.000,00

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Commerciale Italo Somala — S.C.I.S., sono convocati in Assemblea Ordinaria presso gli Uffici di Recapito della Spett.le S.A.I.S. in Italia, Piazza degli Affari, 3, Milano, il giorno 11 Giugno 1976 alle ore 8 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 30 Giugno 1976 alla stessa ora e nello stesso luogo per deliberare sul seguente:

### ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Bilancio e Conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1975 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio, o presso gli Uffici di Recapito della S.A.I.S. in Milano, Piazza degli Affari, 3, oppure presso le seguenti casse:

- Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).
- E.I.F.A., Via Pioda n. 14, Lugano (Svizzera).
- Credito Italiano, Sede di Milano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S.A.I.S. — S.p.A.

Saldhigga: Muqdisho ( J. D. Soomaaliya ) — Ra'asumaal Shs. So. 1.200.000,00

---

## OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Agricola Italo Somala — S.A.I.S., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Xafiiska Sharikadda ku leedahay Milano, Piazza degli Affari, 3, maalinta 11ka Juunyo 1976. Saacadda markii ay tahay 9,30, fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doona maalinta 30ka Juunyo 1976 isla saacadda kor ku qoran, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarayaasha;
2. — Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31-12-1975.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qabayaa-sha ku qoran buuga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo na ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaa-shooda Saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Sharikadda ku yaal Itaaliya, Piazza degli Affari, 3, Milano, amase:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).

## GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S.A.I.S. — S.p.A.

Sede Sociale: Mogadiscio (Repubblica Democratica Somala)

Capitale versato Shs. So. 1.200.000,00

---

## AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Agricola Italo Somala — S.A.I.S. — sono convocati in Assemblea Ordinaria in Milano, presso gli Uffici di Recapito della Società, Piazza degli Affari n. 3, il giorno 11 Giugno 1976 alle ore 9,30 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 30 Giugno 1976 nello stesso luogo ed alla stessa ora, per deliberare sul seguente:

### ODRINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Bilancio e Conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1975 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso gli Uffici di Recapito della Società in Italia, Piazza degli Affari, 3, Milano oppure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano.
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana — Lugano (Svizzera).

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE